



Hagida waxay aqoonsaysaa shaqooyinka kaa caawinaaya u wareegista daryeelka caafimaadka dadka waawayn ee dhalinta u nool si madax banaan marka ay qaangaaraan. Heer kasta oo da'eed wuxuu leeyahay shaqooyin la qabanaayo oo dheeri ku ah qaybaha heerkii hore ee da'da. Dhalinta qaar ayaa laga yaabaa inay diyaar u yihiin fulinta shaqooyinka xili hore, halka qaar kale ay bilaabi karaan da' danbe. Maaha in dhammaan shaqooyinku quseeyaan qof kasta. Shaqooyinka qaarkood ayaa u baahan in waalidku ka caawiyo ama korjoogteeyo. Hase yeeshee, yoolku waa in la dhiiri geliyo madax banaanida qofka da'yarta ah sida ugu badan ee macquulka ah.

Marka la gaaro da'aha 12-14 (At around ages 12-14) Marka la gaaro da'aha 14-16 (At around ages 14-16) Marka la gaaro da'aha 16-17 (At around ages 16-17) Marka la gaaro da'aha 17+ (At around ages 17+)

CODSO: (APPLY FOR:)

- Lambarka Caymiska Bulshada (SIN, Social Insurance Number)
Xisaabta Baanka

- Ruqsada darawalka ama aqoonsiga sawirka leh ee dawlada bixisay
Ciwaanka Alberta.ca

- Gunnooyinka caymiska caafimaadka**
Maal gelinta Qofka wayn**
Waxbarashada iyo taageerada dugsiga sare kadib
Deegaha waxbarashada iyo caawimaadaha tacliinta
Daryeelka Guriga ee Qofka Wayn** - Ka qaybgalka Tababarka haddii aad samaynayso Daryeelka aad Iskaa u maamulayso (SMC)
Taageerista Go'aan Gaarista
Fursadaha waxbarashada, Shaqada, iyo/ama mutadawacnimada

XOG KA OGOOW: (LEARN ABOUT:)

- Xaaladaada caafimaadka, xasaasiyaadka, daawooyinka, daawaynada, iyo heerka xanuunka
La hadlida kooxdaada daryeelka Caafimaadka
Sida doorarka daryeeluhu isskula badelayaan u wareegista daryeelka caafimaadka qofka wayn
Kooxaha taageerada, fursadaha mutadawaca, iyo ku xirista dhalinta kale ee u wareegaaya daryeelka caafimaadka dadka waawayn
Dookhyada Qaab Nololeedka ee caafimaadka qaba
Gaadiidka dadwaynaha iyo/ama helitaanka
Caafimaadka Dhimirka
Galmada iyo caafimaadka taranka
La dhaganka bulshada iyo fursadaha dalxiiska
U doodista naftaada
Qarsoodiga Sirta, ogolaanshaha faahfaahsan iyo xuquuqaha bulshada
Maamulka lacagta
Badqabka naftaada tignooloojiyada, baraha bulshada, iyo badqabka kumbuyuutarka)

- Sida xaaladaada caafimaadku u saamayn karto madax banaanidaada mustaqbalka. Tusaale ahaan:
Gaari wadista
U noolaanshaha si iskaa ah
Waxbarashada
Shaqaynta
Mutadawicida
La qabsiga hawl maalmeedyada (tusaale, cunto karinta, shaqada guriga, iwm.)
Sida daawooyinkaagu ay ula falgeli karaan daawooyinka kale, daawooyinka wadada laga gato iyo khamriga
Khayraadka Bulshada kuwaasoo taageeraaya u wareegista qaan gaarimada

- Farqiyada u dhexeeya daryeelka carruurta iyo dadka waawayn
Isbadellada caymiska caafimaadka marka aad gaarto 18 sano
Miisaaniyada iyo maareynta lacagtaada
Ku noolaanshaha meel ka baxsan guriga
Dookhyada waxbarashada dugsiga sare kahor iyo taageerooyinka la heli karo
Qalabka ama agabka caafimaadka
Gaarista hgo'aanadaada caafimaadka si iskaa ah
Daryeelka Guriga ee Dada waawayn-tusaale Adeegyada Wakaalada ama Daryeelka Qofku Maamusho (SMC, Self-Managed Care)
Maal gelinta Qofka wayn

- Meesha loo wareejinaayo daryeelkaaga
Waxa aad samaynayso haddii aad qabto walaacyo ama su'aalo caafimaad inta lagu jiro wareejinta daryeelka
Wakaaladaha bulshada, barnaamijyada iyo adeegyada
Qorshaynta hore ee daryeelka oo lala sameeyo kooxdaada daryeelka
Tiilmaamaha shaqsiga ah
Khulaasada 3 Weedhood

WAXAA KUU DIYAARIYEEY: (PREPARE BY:)

- Dhamaystirka Liiska Hubinta diyaar Garoowga Dhalinta ama Waalidka sanad kasta
Nidaaminta xogta caafimaadka
Helitaanka dhakhtarka qoyska
Ka caawinta cuntooyinka, dukaamaysiga iyo shaqooyinka guriga
Ka jawaabida/waydiinta su'aalaha marka aad joogto booqashooyinkaaga caafimaadka
Iska diiwaan gelinta Kulannada XoGta Kala Guurka
Ka qaybgalka go'aannada caafimaadka

- Dejinta jadwalkaaga cunista daawooyinkaaga
Helitaanka balan aad la yeelato dhakhtarka qoyskaaga ugu yaraan halmar sanadkii
La socoshada xogta muhiimka ah ee caafimaadka
Siinta waqti caafimaad oo aad kula hadlayso dhakhtarkaaga si iskaa ah
Xaqiijinta in dhakhtarka qoyskaagu uu helo dhammaan macluumaadka quseeya ee caafimaadka

- Cusbooneysiinta qalabkaaga caafimaadka
Xaqiijinta in booqashooyinka ugu danbeeyay ee caafimaadka ilmaha la mudeeyo
La tashiga dhakhtarka si iskaa ah
Buuxinta ama dib u buuxinta daawooyinka lagu qoro
Ku tababarashada hawlaha nolol maalmeedka, sida qabsashada balamahaaga si iskaa ah ama dalbashada biisada

- Qabsashada balantaada gaarka ah ee caafimaadka qofka wayn
Diyaar garoowga booqashooyinka rugtaada caafimaadka.
Ka qaybgalka balamaha si iskaa ah ama adoo tilmaan helaaya inta balamahaaga lagu jiro
Abuurista dardaaranka shaqsiga ah
Codsashada nuqullada warbixiniidii ugu danbeeyay ee warbixinada caafimaadka ilmaha, waraaqaha dhakhtarka iyo khulaasooyinka kooban ee wareejinta caafimaadka
Adeegsiga xasuus qorka caafimaadka ee ku haboon dadka waawayn